Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya
Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya
Golaha Shacabka

Hadal-qoraalka kalfadhiga 7-aad
Documentiga Kal.7-aad kul.12-aad **23/11/2015**

Kalfadhiga 7-aad
Kulankiisa 12-aad Saac.fur.12:03gd.Saac.Xir.1:40 gd.
Guntinta(Quorum) 157-Xildh.
Ajendaha:-

1. **Furitaanka Aayadaha Qur'aanka Kariimka ah**
2. **Ansaxinta Ajendaha**
3. **U codeynta Sharciga Maalgashiga Shisheeye**
4. **Warbixinta Guddiga Darbiga Soomaaliya iyo Kenya.**

1.Shir-guddoomiye, Guddoomiyaha Baarlamanka JFS Mudane Maxamed Sheekh Cusmaan (Jawaari).
Waxaa shirka Furey Guddoomiyaha Baarlamaanka JFS Mudane Maxamed Sheekh Cusmaan (Jawaari) ,waxaana lagu furey Aayadaha Qur'aanka Kariimka,uuna akhriyey Xildhibaan Sheekh Shaacir.

2.Kadib, Guddoomiye wuxuu soo jeediyey in Ajendaha maanta uu yahay u Codeynta Sharciga Maalgashiga Shisheeye iyo warbixinta Guddiga Darbiga Soomaaliya iyo Kenya . wuxuu soo jeediyey in la nasaxiyo Ajendaha Xildhibaanadana way ansaxiyeen.wuxuu intaa ku darey in uu shirka fuaranyahay lana ansaxiyo Ajendaha ,Xildhibaanadaha way ansaxiyeen.

3.Guddoomiye wuxuu xoghaynta u sheegay in la soo gudbiyo tirada Xildhibaanada Fadhiya,si loo gudagalo u Codeynta Sharciga Maalgashiga Shisheeye, inta fadhida ee Xildhibaanada waxay noqdeyn 147.

4. Guddoomiyaha wuxuu u yeerey Guddoomiyaha Guddiga Ganacsiga BJFS,Xildhibaan C/llaahi Jaamac si uu wax ugu yiraahdo sharciga Maalgashiga Shisheeye.

5. Guddoomiyaha Guddiga ,wuxuu sheegay in Guddiga Maalgashiga shisheeye 1987kii ay tiradoo ahaayeen 19 Xubnood.kadiba ayaa wax ka bedel lagu sameeyey oo laga dhigay 17 xubnood.wuxuu soo jedeyey in loo baahanyahay in guddiga la farsameeyo loona xilsaaro

Guddoomiyaha Baarlamanka .waxaa kaloo garabtaagan in la habeeyo Bankiyadda,wuxuuna soo jeediyey in loo codeeyo lana ansaxiyo Sharciga Maalgashiga .

5.Wasiiru-Dowlaha Wasaaradda Ganacsiga iyo Iskaashiga Caalamiga Mudane, Xasan

Wuxuu sheegay haddii sharcigaani uu Golaha Baarlamanka gudbiyo oo ansaxiyo la helayo maalgashi shisheeye ,waxaa la helayaa shaqo badan oo dan u ah Dadka iyo Dalka Soomaaliyeed.

6.Guddoomiyaha wuxuu sheegay in la gelaayo Codeyntii ,wuxuuna soo jeediyey inta ogol sharciga Maalgasiga Shisheeye ay gacanta taagto, kadibna inta diidan,kadibna inta ka aamustay,Natiijadana waxay noqotey sida tan:-

143-Xildh.way ogolaatey

1-Xildh.wuu diiday

3- Xildh.way ka aamuseyn

Guddoomiyaha wuxuu sheegay in sharcigaan ay u codeeyeen 147 Xildhibaan ,waxaana ogolaadey 143 ,Sidaa daraadeed,wuxuu sheegay in uu ansax yahay Sharcigaan loona gudbinaayo Madax-weynaha JFS.

Inta aan loo gudbin Ajendaha 2-aad , Guddoomiyaha wuxuu u yeeray Wasiiru-Dowlaha Wasaarada Ganacsiga Mudane Xasan ,

7.Wasiiru Dowlaha W/Ganacsiga wuxuu u mahadceliyey Guddoomiyaha Baarlamanka iyo k/xigeenadiisa ,Xildhibaanada Golaha Baarlamanka oo sida wanaagsaneed u ansaxiyeen Sharcigaan Maalgashiga Shisheeye.

8.Guddoomiyaha Baarlamanka wuxuu u tacsiyeeyey Safiirka Soomaaliya oo u fadhiyey Dalka Masar oo geeriyoodey iyo Suldaan Cibaar oo ka mid ahaa saxiixayaashii ,wuxuu Illaah ugu baryey in uu siiyo samir iyo Iimaan.

9.Guddoomiyaha wuxuu sheegey in ay u gudbayaan Ajendaha qeybta 2-aad ee kulanka maanta oo ah Guddiga Xaqiiqa raadinta darbiga laga dhisaayo Soomaaliya iyo Kenya wuxuu u yeeray Xildhibaan C/llaahi Habdhowre.

Xildh. C/llaahi Habdhowre ,wuxuu warbixin ka bixiyey Wafdigii Guddiga xaqiiqa raadinta safarkii ay ku tageyn Mandheera ,Buula Xaawo iyo lamuu. Wuxuu sheegay in guddiga muddadii ay kormeerka ku maraayeen dhulka xuduud beenaadka u dhaxeeya Soomaaliya iyo Kenya, in aysan soo arkin darbi halkaas laga dhisaayo ,laakiin ay soo arkeyn dhul dhirirkiisu gaarayo 700km.la baneeyey ,lagana qodey god dhererkiisu gaarayo 700 mitir,ballaciisuna yahay 1.5mitir kuudadakii ay kala dhigeyn dowladihii Talyaaniga iyo Ingiriiska dhulka u dhaxeeya Soomaaliya iyo Kenya oo ahaa 29 kuud (calaamadood) welina ay suranyihiin.

Guddiga waxay talo ku soo jeediyeen in qaraarka Golaha ay ka soo saareyn Darbiga u dhaxeeyo Soomaaliya iyo Itoobiya aan laga dhisikarin Darbi.Soomaaliya Dhulkeeda ,Badeeda iyo Cirkeeda waa mid muqadis ah oo lama taabtaan ah.inta laga helaayo dowlad shacabka ay soo doortaan.

10.Guddoomiyaha wuxuu u yeeray Admiral Faarax Qare si uu wax ugu yiraahdo kormeerkii ay guddi isaga uu ka midyahay ugu tageyn dhulka Soomaaliya iyo Kenya.

11.Admiral Faarax Qare wuxuu sheegay dowladii Barqash Qarnigii 18-aad iyo 19-aad gacan ku haynta xeebaha ka gadatey Dowladda Ingiriiska, dowladihii shisheeye Cilmaaniyiinta ahaa marka ay soo galeyn Soomaaliya 1889,meesha hadda loo yaqaan jubba Land la siiyey talyaaniga kadib markey talyaaniga iyo ingiriiska shirk ku yeesheen London 25-July 1924kii. 1937kii Talyaaniga iyo Ingiriiska geeska Afrika haystey iyagoo laba guddi ah ay calaamadu kuudad ah dhigayn ay ku kala qeybsanaayeen dhulka Soomaaliyeed,kuudadkaas waxay gaarayaan 29-kuud oo calaamado ah wuxuu kaloo sheegay in kuudka 6-aad marka uu gaaray Raaskanbooni waa ay toosantahay waxaa laga taagay 29-ka kuud kii ugu danbeeyey . wuxuu soo jeediyey in ay u baahanyihiin markii laga reebo xagga Cilmiga ,waxa lagu hadlaayo ma aha wax layska dhoo-dhoobey ee waa documanti, maalintaa waxaa loo keenay ducumaentigii xaqiiqada ahaa kuudka ugu danbeeya waa kan 29-aad. Wuxuu intaa ku darey in 2- kuud inta u dhaxaysa dhaxdooda ay u baahantahay caddeyn wuxuu sheegay in warkiisu uu ahaa mid khabiirnimo balse ma aha mid siyaasadeed. Calaamadahaa 29-ka ah waxaa sameeyey niman injineero ah oo laysku keenay Mandheera ,Belet-xaawo ayey Kuudka 1.aad ka bilaabaneysa ilaa dhamas laga gaaro ,markii dhamas la gaaro qaluuc ayaa ku jira .Caabud-waaq ilaa Raascanbooni way toosantahay ,ilaa lambarka 23 R/kamb midaa ayaa la qaloociyey ilaa Beled-amiin .Beled-xaabo Lam.2-aad , wax aan jiin in qofka lagu luggooyo ma aha ,xariiqan toosan in lagaley iyo in aan lagelin Ceel-waaq iyo Dhamas waxay u baahantahay dad qubaro oo injineero ah.

Xildh.C/llaahi Jaamac, wuxuu sheegay in ay tahay in arrinkaan albaabka loo xiro. Qod.7-aad ee Dastuurka wuxuu sheegayaa **Cir, Dhul iyo Bad ,waa lama taabtaan,** loona baahanyahay in la adkeeyo oo sharci loo sameeyo ,adduunka waxaa ka jira Qaynuun Caalami ah. wuxuu soo jeediyey in sharcigaan la sameeyo. Seddexda qodob ee halkaan laga soo jeedyeyna la ayido oo cod loo qaado.

12.Guddoomiyaha ,wuxuu sheegay in loo soo gudbiyey Sharciga seddexda qodob,Guddiga waxay soo saareyn shalay 6- qodob waxay ka badin waayeen ilaa arbaco in ay keenaan Golaha Baarlamanka waa mashruuc sharci oo ka bilowdey Baarlamanka .

Wuxuu kaloo sheegay in ay is qoreyn ilaa 20 xildhibaan si ay ugu doodaan darbiga Xuduudka laga dhisaayo.

Xildh. C/llaahi Sheekh Ismaaciil. Wuxuu sheegay in arrinta xuduuda Soomaaliya in aan ka mid ahayn khabiirada baarayey Wasaaradda Arrimaha Dibadda ay noo xilsaartey iyo in aysan jirin wax muran ee xuduuda ah . Isticmaarkii ayaa dejiyey Xuduudada waxaan jirin wax comunicy ah oo ka soo baxay **Madax-weynayaasha Danial Arab Mooy iyo Madax-weyne Maxamed Siyaad Barre,**wax muran ma jirin xagga xuduuda. Wuxuu xilligaas ahaa Wasiirka Arrimaha Dibadda ee Soomaaliya ,wuxuuna soo saxiixay Dulka Soomaaliya waa lama taabtaan .

Wuxuuna soo jeediyey in Guddiga sameynayo sharciga Xuduudaha illaaliyaan Xuduudaha Soomaaliya ay caddeyso wixii tallaabo ah oo ay ka qaadaneyso .wuxuu soo jeediyey in Xukuumadda war dhab ah ka soo saarto arrimahaan.

Xildh.Xuseen Carab Ciise. Wuxuu sheegay in uu ayidsanyahay warbixinta Guddiga ay soo diyaariyeen

Xildh. Maxamed Cabdi Xasan (Becos),wuxuu sheegay in Xukuumadda Soomaaliya looga Baahanyahay in ay door weyn ka ciyaarto arrinkaa xuduudaha tallaabo laga qaado dowladda Kenya.

Xildh. Goodir, wuxuu sheegay in ay tahay mid uu sameeyey Isticmaarka ,waxaa la oranjirey Xuduud Beenaadka .wax dood la yiraahdo ma jirto ay ku heshiiyeen labada dal Soomaaliya iyo Kenya.Wuxuu soo jeediyey in aan la sharciyeeynin xuduud beenaadka.

Xildh. Cabdi Barre Jibriil,wuxuu sheegay in uu aad ugu xunyahay in la yiraahdo Xuduuda waa in la yiraahdo Xuduud-beenaadka oo ay warbaahintu sheegto xuduud-beenaadka.

Xildh.Jaamac ,wuxuu sheegay haddii la yiraahdo sharci aan u sameyno ,waxyaalo kale ayaa maqan .Xuduud-beenaad waxaa ka qoran qodob Dastuurka oo sheegaya Xuduudayna Dhulka Cirka iyo Badda waa lama taabtaan. Wuxuu soo jeediyey in laga bedelo xagga siiqada loo qoraayo.

Xildh.C/llaahi Xasan Rooble, wuxuu sheegay in layska ilaaliyo in aan ka hadalno xuduud mana ku qorna ,wuxuu soo jeediyey in la yiraahdo dhulka u dhaxeeya .

Xildh. C/qaadir Xaashi , wuxuu sheegay in guddiga uu soo shaqeeyey laakiin 1964kii AOU, in xuduuda laysla ogolaadey .Ingiriiska waxay isla garteyn in xoola dhaqatadeeda ay isu gudbikaraan ,wuxuu intaa ku daray in wasiirka gaashaandhiga tagay halkaa .

Xildh.Maxamuud Dhuux, wuxuu sheegay in ay xaaraan tahay in sharci loo sameeyo,wuxuu soo jeediyey in lawada toosiyo wixii wada shaqeyn ah .

13.Guddoomiyaha wuxuu sheegay in la soo ogaadey in uu derbi dhisneyn,wuxuu soo jeediyey in lagu dadaalo qabyo qoraal sharcigaan.

Kalfadhiga 7-aad kulankiisa 12-aad uu shir-guddoominaayey Guddoomiyaha Baarla Manka JFS, Mudane Maxamed Sheekh Cusmaan (Jawaari),wuxuu sheegay in uu shirka xiranyahay saacaddu markey aheyd 1:40 gd.